

Ka jawaabida su'aalahaaga ee ku saabsan Tallaalka COVID-19

Tallaalka COVID-19 badbaado ma yahay? Waxaa loo sameeyay si degdeg ah.

Haa. Maraykanku waxa uu hubiyaa in dhammaan tallaalku uu badbaado u yahay sida suuragalka ah. Saynisyahanada ayaa u sameeyay tallaalka COVID-19 si degdeg ah, laakiin weli waxay raaceen tallaabooyinka badbaadada isku midka ee ay raacaan dhammaan tallaalku. Malaayiin dad ah oo isiro iyo qoomiyado kala duwan ah ayaa la tallaalay.

Miyaa tallaalka COVID-19 qabtaan shaqo ku lid ah noocyada fayraska cusub?

Haa. Marka fayrasyadu isbeddelaan, waxaa loogu yeedhaan noocyo kala duwan. Daraasadahu waxay soo jeedinayaan in tallaalka COVID-19 uu ka ilaaliyo noocyada cusub ee hadda. Xataa haddii qofka la tallaalay uu qaado COVID-19, uma jiranaan doonaan sida ay ahaan lahaayen haddii la tallaalo.

Miyaan tallaalka COVID-19 ka qaadi karaa COVID-19?

Maya. Tallaalka COVID-19 kama koobna fayras nool. Tallaalka COVID-19 waxa uu ku shaqeeyaa isagoo baraya nidaamkaaga difaaca sida loola dagaalamo fayraska sababa COVID-19. Wakhtiyada qaarkood tani waxay sababi kartaa astaamaha, sida qandho. Astaamahan waa caadi. Waa calaamado in jidhkaagu dhisayo difaaca ku lidka ah fayraska.

Badbaado ma ii tahay aniga inaan qaato tallaalka COVID-19 haddii aan jeclaan lahaa inaan ilma dhalo maalin uun?

Haa. CDC waxay ku talinaysaa tallaalka COVID-19 haddii aad isku dayayso inaad uur yeelato hadda ama inaad uuraysato mustaqbalka. Ma jiraan caddayn in tallaalka kasta ay sababto dhibaatooyinka ubad dhalida ee haweenka ama raga. Tan waxaa ka mid ah tallaalka COVID-19.

Miyaa qof uur leh ama naas nuujinaya uu qaataa tallaalka COVID-19?

Haa. American College of Obstetricians iyo Gynecologists waxay ku talinayaan tallaalka COVID-19 ee dadka uurka leh ama naas nuujinaya. Caabuqa COVID-19 muddada uurku waxay kordhisay khatarta jirada darran iyo dhalashada xiligeeda ka horaysa. Faa'iidooyinka qaadashada tallaalka COVID-19 muddada uuraysiga waxay ka miisaan bataa khatar kasta oo suuragal ah. Haddii aad qabto su'aalo, la hadal adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

